

Waalidka qiimaha lahow:

Waalidnimadu waa arin aan sahlaneyn.
Maalmaha qaarkood waa wax wanaagsan, xiiso leh, isla markaana farax ku dheehan yahay.
Maalmaha qaarna ma sahlana mana hubtid inaad howshaada waalidnimo qabsan karto iyo in kale.
Waalid noqoshadu ma aha wax xun.
Waalidnimadu waa howsha ugu muhiimsan ee aad weligaa qaban doonto.

Waan ognahay in waalidnimadu ahaan karto hawl adag. Waxaan kaloo ognahay in caruurtaadu kugu weyn yihiin. Mar kasta sida aad dooneyso uma dhaqmaan. Hadana, marka aad barato sida wax loogu sheego, waxaad moodaa in marka ay weynaadaan ay u baahan yihiin qaab cusub kaas oo ah mid dhib iyo farxadiba ay ku dheehan yihiin.

Tarbiyeynta Wanaagsan: Hagaha Waalidku wuxuu ka hadlayaa arimaha guud ee waalidka la soo gudboonaada marka ilmuhu dhasho ilaa inta uu ka gaarayo bilowga dugsiga hoose. Ujeedadeenu waa inaan kuu sheegnaa qaababka aad u xalin kartid arimahaas kula soo gudboonaada, inagoo isticmaaleyna qaabka tarbiyeynta wanaagsan ee hagidda akhlaaqda ilamaha. **Buuggaan waxaa ka buuxa fikrado aan ognahay run ahaantii inay shaqeeyaan.**

Hal arrin oo aanaan marnaba ku talin doonin
waa dharbaaxidda ilmaha. Waan ognahay
waalidka badankiisu ma dharbaaxaan ilmaha,
balse mararka qaarkood waxaad moodaa inaan
wax kale shaqeyneynin. Run ahaantii, waxaa jira
siyaabo kale oo ka wanaagsan oo ilmuhu u baran
karo sida wax loo qabto ama u muujiyo akhlaaq
wanaagsan adigoo aan dharbaaxin.

Waxaa muhiim ah inaad ogaato in uu jiro xiriir u
dhexeeya dharbaaxada iyo caafimaadka
ilmahaaga. Caruurta aan la dharbaaxin waxay
leeyihiin maskax fiican, isku kalsoonaan, iyo
iyagoo aan aad isugu buuqin. Caafimaadka
wanaagsan waa waxa aan higsaneyno. Waxaa jira
macluumaad badan oo aad ka heli karto bulshada
iyo degmadaada kaana caawin kara sidii aad u
noqon lahayd waalid wanaagsan - meelahaas
waxaa ugu muhiimsan rugta caafimaadka
qoyskaaga.

Marka aad waalid noqoto, waxaan rajeyneynaa in
buugaan ku siiyo fikrado iyo talooyinka aad u
baahan tahay, si aad u gudato waajibkaaga
waalidnimo.

Children's Hospitals and Clinics

